

# Raashinka Lagu Koro

19 ILAA24 BILOOD

Iimahaagu wuxuu baranayaa inuu cuno cuntooyin adag aadna wuu u firfircoo yahay. Nafaqada wanaagani waxay ilamaahaga siisaa wixii uu u baahan yahay inuu u koro sidii la rabey, caafimnaad wanaagsan, tabar uu ku dhaqdhaqaqo, ku ciyaaro iyo uu wax ku barto.

## Waan awoodi karaa:

- Waan cuni badi raashinka qoysku cuno
- Inaan calalliyoo cunto adag
- Isticmaalo qaadada aniga oon waxba daadinin
- Ku hayn kara koobka hal gacan
- Barta sida wax loogu cuno fargeetada
- Bilaabaan iney yidhaahdaan weedha "in badan" iyo "dhamaadey"



*"Iga caawi sida loo cadeydo ilkaha maalintii laba jeer iyo inaan booqdo dhaqtarka ilkaha ugu yaraan sanadkii hal mar"*

## WAA MAXAY WIXII IYO SIDII AAD U CUNTEYSIIN LAHAYD CUNUGAAGA MAALIN WALBA

<b>Badarka/Rootida 2 - 3 wiqiyadood maalintiiba</b>	<b>1 wiqiyad waa:</b>  1 jeex oo ah rooti ama tortiilo ½ oo ah bariis la kariyey, baasto ama qamadi la kariyey 1 koob oo ah siiriyalka WIC 5 xabo oo buskudka xoorshaha ah	<b>I sii:</b>  Badarka oo isku jirka ah sida rootida laga sameeyey qamadiga isku jirka ah een laga saarin buunshiga, qamadi isku jirka ah ama tortiilada galeyda laga sameeyey, qamadi la kariyey, baastada laga sameeyey qamadiga isku jirka ah, qamadi la kariyey ama bariiska cowlan
<b>Khudaarta cagaaran 1 koob maalintii</b>	<b>1 koob waa:</b>  1 koob oo ah khudaarta cagaaran oo la googooyey ama la kariyey 1 koob oo ah casiirka laga miirey khudaarta cagaaran	Khudaarta aadka u cagaaran ama jaalaha ah maalin walba sida kaarotada, baradhada macaan ama barakooliga Khudaarta cagaaran oo la kariyey
<b>Miraha 1 koob maalintii</b>	<b>1 koob waa:</b>  1 koob oo la googooyey, miraha jilicdasan ama la kariyey 1 yar oo moos ah 1 koob oo ah 100% casiirka laga miirey miraha ½ koob oo ah miraha la qalajiyey	Ilaha laga helo fitamiin C maalinwalba sida liin-macaanta, strawbariga iyo qaraha Miraha oo la kariyey ama jilicsan sida tufaaxa la cajjimey ama qaraha 4 wiqiyadood oo ah casiir laga miirey miraha ama khudaarta cagaaran oo lagu siijo koob
<b>Caano 2 koob maalintii</b>	<b>1 koob waa:</b>  1 koob oo ah caanaha aan subaga laga saarin ½ koob oo ah farmaajo la qurbey 1 koob oo ah caanofadhi 2 koob oo ah foormaajada burcadka ah	Caano aan laga saarin subaga oo lagu siijo koob ilaa da'da 2 jir 16 wiqiyadood waa ay ku filan tahay
<b>Hilibka iyo Digirta 1½ wiqiyadood maalintii</b>	<b>1 wiqiyadood waa:</b>  ½ oo ah lugaha digaaga ama ½ oo ah hilibka lo'da oo la shiidey kadibna la balaadhiyey 1 wiqiyadood oo ah maley ama hilibka kale 1 unuk ah ¼ koob digir ah oo karsan	Hilib si fiican loo kariyey oo la googooyeye ama la jilicsan Digirta WIC oo la kariyey ama la qooshey

## Guro Cuntada Fudud ee Caafimaadka leh

Cuntooyinka fududi waxay caawiyaan cunugaagu inuu koro. Sii:

- Khudaarta miraha ah ood dhishey
- Jeex foormaajo ah
- Buskudka xoorshaha ah ee laga sameeyey badarka isku jirka ah toortiilada ama rootida
- Caanofadhiiga ama foormaajada leh burcadka



*"Waxaan jecelayahay waxa joogtada ah. I sii raashinka iyo cuntooyinka fudud waqtii isku mid ah maalin kasta."*

## NOOCA CUNTADA IYO QIYAASTA

Quraacda	1 ukun la isku qasey oo la shiileey ½ jeex ah rooti qamadi isku jirka ah laga sameeyey ½ koob caano aan subaga laga saarin
Cunada fudud ee subaxdii la cuno	¼ ilaa ½ koob ah bandariin liin-macaan ¼ ilaa ½ koob ah siiriylalka WIC ee qalalan
Qado	Taakada jilicdasan (soft taco) (½ oo ah toortilada laga sameeyey qamadiga isku jirka ah oo lagu darey 2 qado oo hilibka lo'da ee shiidan) ½ koob kaarooto karsan ½ tufaax la goo'gooyey oo la kariyey ½ koob caano aan subaga laga saarin
Cuntada fudud ee Galabtii la cuno	3 ilaa 4 qajaar la jarjarey ½ doolshe bariis laga sameeyey
Cashada	Digirta cas iyo bariis (¼ koob ah digirta cas oo lagu darey ¼ ah koob bariiska cowlan) ½ koob ah digirta cagaaran ½ koob ah qare la googooyey ½ koob ah caano aan subaga laga saarin
Cuntada fudud	2 ilaa 3 buskudka xorshaha ah ee laga sameeyey qamadiga isku jirka ah ½ koob ah caano aan subaga laga saarin



## Bilow Dabeeecdado Caafimaad leh

- Cun khudaartaada. Caruurtu waxay ku daydaan waalidka.
- U wada Cunteeyaa qoys ahaan.
- Miiska wada fadhiista marka aad cuntada cuneysaan ama cuntada fudud.
- Sii sadex jeer oo cunto ah ama laba ilaa sadex jeer oo cuntada fudud ah maalin kasta waqtii isku mid ah.
- Telefishinka dami waqtiga cuntada la cunayo.
- Maydh gacmaha cuntada ka hor iyo ka dib.

## Talo siin Ku Saabsan Waqtiga Cuntada la Cunayo oo Farxad leh

- Go'aanso watqiga aad cuntada siin lahayd iyo wixii aad siin lahayd.
- U ogolow ilmahaaga inuu cuntada kaga tago saxniga. Ilmahaagu waa qofka kaliya ee og inuu gaajoonayo iyo inuu dharagsan yahay isaga ama iyada ayaa go'aansan doona intii uu rabo inuu cuno, xataa hadii aaney waxba hadhin.
- Ilmahaaga ha ku baadin, inuu ciyaaro ama ha ku khasbin inuu wax cuno.
- Isticmaal saxonada loogu talo galeylaha, koobka, qaadada, iyo fargeetada. Kuwani aad ayay ugu fiican yihiin gacmaha caruurga yaryar.
- Ugu yaraan hal cunto oo ilmahaagu jecel yahay sii. Hadii aanuu jecleynta kale eed siisey, wuxuu cuni ta uu rabo.

- Sii cuntada:
  - In afka hal mar la gashado ama gobol yar oo ilamhaaga u fudud inuu hayn karo
  - Taasi oo jilicsan lana calalin karo
  - Taasi oo ah mid dabacsan sida caanofadhiqa
  - Taasi oo aan aad u kululeyn ama u qaboobeyn
- Mar walba ku tijaabi cunto cusub. Waxay qaadan kartaa in ka daban 10 ilaa 15 jeer ka hor inta ilmahuhu afka gashan doono cunto cusub.
- Qorsheyso waqtii aan buuqlahayn cuntada iyo cuntada fudud ka hor. Caruurtu si fiican ayey u cunaan marka ay degan yihiin.
- U diyaar garow in wax daataan. Soo dhaweyso warqada faraha lagu masaxdo ama tuwaal.

## Cunto Caafimaad leh oon khatar laheyn

Sii noocy kala duduwan oo ah cuntooyinkani

- Khudaarta cagaaran iyo miraha sida tamaadhada, barbarooniga macaan iyo liin-macaanta
- Biyo, caano aan subaga laga saarin iyo 100% casiirka. Ka yaree cuntooyinka ama cabitaanada leh milixda ama sonkor badan, sida soodhaha, buskudka ama baradhada la shiiley
- Cuntooyinka leh macdanta feerada sida hilibka, digirta and siiriylalka lagu darey fiitamiino ama badarka

Cuntooyinkani waa ay fiican yihiin inaad siisid ilmahaaga marka da'diisu ay tahay 1 sano:

- Ukun            · Soya            · Qamadi
- Maley            · Caano aan sugaba laga saarin
- Xayawaan hilibkooda la cuno oo bada ku nool (Shelfish)

Ogow: Hadii qoyskaagu uu leeyahay xasaasad (allergies) xaga cuntada ah, waxaa laga yaabaa inuu dhakhtarkaagu kugula taliyo inaad bilowdo cuntooyinkani waqtii danbe.

Ha siin cuntooyinka ilmahaaga jiro u keeni kara:

- Hilib aan la karin amaa si fiican loo karin, digaaga, turkida ama maleyga
- Ukun aan la karin amaa aad loo karin
- Hilibka karsan ee lagu gado dukaamada (jeex ah turkida hilibkeeda ee iyaga oo karsan la soo gato ama khaansiir) ilaa dib aad ugu kululeysid mooyee
- Casiirka amaa caano aan la karin—kuwani lagama daaweyn si looga dilo jeermiska kaasi oo ilmahaaga jiro ku keeni kara

*"Mararka qaarkood in badan ayaan cunaa  
mararka qaarkoodna in yar ayaan cunaa.  
I sii in yar. Waan ku weydiisan doonaa hadii  
aan wali gaajeysanahay!"*

WIC #1284 Somali (12/10)



Missouri Department of Health and Senior Services

FURSAD LOO WADA SIMAN YAHAY/SHAQO BIXIYE ILAALIYA SHARCIGA XUQUUQDA IYO XADGUDUBKA Adeeyada waxaa loo bixiyaa iyadoon lagu saleynin wax takoor ah. Warqadani dalaabadka ah waxaad ku heli kartaa siyaabooyin kale sida kuwa loogu talo galay qofka curyaanka ahi waa inuu la xariira Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyadda Dadka waaweyn ee Missouri. Dadka Maqalka iyo Hadalku ka la'xaad la telafoonkoodu waa 573-71-6204. Codka 1-800-735-2466.

